

Shahaadada koroona ee Woqooyiga Ayrland ayaa la aqoonsanayaa laga bilaabo 18-ka Ogos

Norway waxay laga bilaabo Arbaca 18-ka Ogos saacadda 15:00 aqoonsanaysaa shahaadada koroona ee waddanka Woqooyiga Ayrland. Markaas ayaa la bilaabayaa in xadka lagu xaqiijiyo QR-ta ku taalla shahaadada koroona ee Woqooyiga Ayrland.

San Marino iyo Faatikaanka ayaa hadda ka mid ah nidaamka Midowga Yurub ee ka kooban shahaadooyin koroona oo la xaqiijin karo, taas oo keenaysa in shahaadooyinkaas laga aqoonsan yahay Norway.

Go'aankan waxa macnahiisu yahay in dadka ka yimaada waddamadan ee si buuxda u tallaalan ee qaatay tallaallo ay hay'adda dawooyinka ee Yurub (EMA) aqoonsan tahay, ay si xor ah u soo geli karaan Norway. Waxa la mid ah dadka cudurka koroona ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay. Waxa dadkan laga dhaafayaa karantiilka soo gelidda waddanka, iyo keenista shahaado caddaynaysa in ay iska qaadeen tijaabo cudurka laga waayey, iyo buuxinta foomka diiwaangelinta soo gelidda iyo in ay tijaabo iska qaadan marka ay xuduudda yimaadaan.

Dadka socdaalka ah ee ka imanaya Woqooyiga Ayrland ee wata shahaado koroona oo shaqaynaysa, ee ku jira hoteel karantiil oo ku yaalla Norway marka uu wax-ka-beddelkani dhaqangalo maalinta arabada, waxa loo oggol yahay in ay ka baxaan hoteelka.

Nidaamka shahaadada koroona ee Woqooyiga Ayrland waxa uu aad ugu eg yahay nidaamyada Wales iyo Ingiriiska. Shahaadada koroona ee waddamadaas ayaa 12-kii Ogos la oggolaaday in Norway lagu soo geli karo.